# Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo (FAQs)

**Waa maxay shaqada Xafiiska Sinaanta iyo Cadaallada Isirka ee Degmada San Diego?**

Degmada San Diego waxay balan qaadaysaa faya qabka dhammaan dadka gobalka. Xafiiska Sinaanta iyo Cadaallada Isirka (Office of Equity and Racial Justice (OERJ)) waxaa la aasaasay sanadkii 2020 si uu u xoojiyo balan qaadka dawlada degmada ee sinaanta isirka ayadoo muhiimada la saraayo in aan isirka qofku uusan hadda kadib saamayn ku lahayn go'aainta natiijooyinka nolosha qofka. Hanaankaan wuxuu taageerayaa kooxa dhammaan qoomiyadha, jinsiga, da'da, awooda, iyo aqoonsiyada kale si ay ugu noolaadaan ugana qayb galaan bulshadeena heerkooda ugu sareeya.

Bayaanka shaqadeena:

- Xafiiska Sinaanta iyo Cadaallada Isirka ee Degmada San Diego ayaa iskaashi la samaynaaya bulshada si ay iskula abuuraan isbadellada hormarka leh, adkaysiga leh, taqliidiga ah, ee nidaamiga ah oo lagu sameeyo dawlada Degmada San Diego.
- Waxaan la shaqeynaa waaxaha Degmada San Diego iyo codadka bulshada si loo naqshadeeyo xeerar adag iyo nidaamyo lagu hormarinaayo sinaanta bulshada.
- Waxaan u shaqaynaa inaan u dhexayna bulshada oo dhan waxaana u doodnaa dadka dhibaatadu kasoo gaartay isir nacaybka taqliida ah iyo kuwa nidaamiga ah iyo faquuqa.

**Waa maxay Barnaamijka Deeqda Saamaynta Sinaanta?**

Ujeedada barnaamijkaan cusub waa in kor loo qaado shaqada Xafiiska Sinaanta iyo Cadaallada Isirka ee Degmada San Diego ayadoo la taageeraayo 10 ururada khayriga ah oo la siinaayo maal gelin dhan $100,000 midkiiba. Marka laga soo tago

maal gelinta, barnaamijkaan ayaa loogu talo galay inuu siiyo tababarka dhisida kartida iyo dhisida iskaashi u dhexeeya OERJ, Machadka Khayriga ah, iyo 10 urur oo la siiyo deeqo.

**Ururo noocee ah ayuu Barnaamijka Deeqda Saaamaynta Sinaantu taageeraa?**
Barnaamijka Deeqda Saamaynta Sinaanta ayaa diirada saari doona taageerida dedaallada bulshadu hagayso iyo ururada bulshada ee ka shaqeeya cadaallada bulshada iyo/ama kor u qaadista natiijooyinka loo siman yahay ee aagaga soo socda:

- waxbarashada (dhalaanka yaryar ilaa waxbarashada dugsiga sare/kuleejka)
- dhisida iskaashiga iyo wada shaqeynta bulshada
- farshaxanka, warbaahinta, iyo dhaqanka
- guryaha, hormarinta bulshada, iyo isku socodka
- badqabka dadwaynaha iyo cadaallada dhaqan celinta
- caafimaadka iyo bogsashada
- aqoonta dhaqaalaha iyo hormarinta dhaqaalaha
- nidaamyada cuntada iyo cadaallada deegaanka

**Qasab miyaa inaan ahaado urur khayri ah oo ka shaqeeya una adeegga San Diego si aan u codsado?**
Ilaa inaad tahay maahee urur qabiil oo laga dhaafay canshuurta oo ka shaqeeya Degmada San Diego, codsadeyaashu waa inay yihiin midkood urur khayri oo haysta aqoonsiga 501(c)(3) ama ay haystaan maal geliyaha 501(c)(3) oo ka shaqeeya Degmada San Diego.

**Yaa deeq ka codsan kara barnaamijkaan?**
Waxaan aqbalaynaa codsiyada ka yimaada codsadeyaasha cusub, iyo sidoo kale dadka hadda haysta/horay u qaatay deeqaha lagu bixiyay barnaamijyada kale ee deeqaha Degmada kuwaasoo ka shaqeeya Degmada San Diego, California. Barnaamijkaan waxaa loogu talo galay inuu taageero ururada khayriga ah, ee yaryar oo leh aqoonsiga 501(c)(3) ayna ku baxdo qarashaad dhan $500,000 ama kayar.

**Maxay ka dhigan tahay inaad lahaato aqoonsiga 501c(3)?**
Ururka leh aqoonsiga 501c(3) waxaa loo aqoonsan yahay inaan laga rabin canshuurta Adeegga Canshuuraha Gudaha.

**Waa maxay EIN?**
EIN, ama Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeeyaha ayaa sidoo kale loo yaqaanaa Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha ee Federaalka. Waxaa loo adeegsadaa aqoonsiga shirkad ganacsi, ayna ku jiraan ururada khayriga ah.

**Shaqsiyaadku ma codsan karaan deeqaha, ama waxay u gaar tahay ururada?**
Barnaamijkaan deeqda ayaa keliya maal geliya ururada khayriga ah. Codsiyada shaqsiyaadka ama noocyada kale ee ururada ayaan u qalmin codsiga.

**Waa maxay hanaanka iyo jadwalka codsigu?**
Dhammaan ururada xiiseynaaya codsashada maal gelinta ayaa codsiyada ka heli kara nidaamka SurveyMonkey. Degmada ayaa hadda aqbalaysa codsiyada ilaa *Agoosto 23 marka saacadu tahay 5pm PST.*

**Maal gelin intee dhan ayaan codsan karaa?**
Dhammaan cadadka deeqda la heli karo waa $100,000.

**Waa maxay shuruudaha u qalmidu?**
- Ururkaagu leeyahay aqoonsiga 501c(3), uu taageero dhaqaale ka helo urur 501c(3) ah, ama uu yahay urur qabiil oo haysta canshuur dhaaf.
- Uu ururkaagu ka shaqeeyo una adeego bulshooyinka ku nool Degmada San Diego (ayna ku jiraan dhammaan bulshooyinka qabiilka iyo baadiyaha)
- Ay qarashaadkaaga shaqadu ka hooseeyaan $500,000 iyo/ama shaqaale kayar shan oo shaqeeya shaqo buuxda.
- Shaqada iyo/ama barnaamijka ururkaagu ay waafaqsan tahay muhiimadaha maal gelinta (hoos ka eeg)
- Ururkaagu uu gacan ka gaysanaayo dhisida awooda iyo/ama hormarinta natiijooyinka nolosha ee bulshooyinka muhiimada lagu saaraayo barnaamijkaan deeqda.

- Shaqaalaha iyo gudiga ururkaagu so ku soo noolaayeen khibrada faquuqa iyo/ama matalayaan, bulshooyinka ay doonayaan inay saamayn ku yeeshaan sida, danyarta, dadka aan guryaha haysan, cunto yarida, dadka awoodooda dhaqaale xun tahay, booliiska xad dhaafka ah ka shaqeeyo aagooda, saamayntu ka soo gaartay nidaamka cadaallada danbiyada, iyo bulshooyinka cadaallada deegaanka.

**Ma jiraa qaab gaar ah ama tusmada soojeedinnada deeqda?**
Haa, codsiga oonlaynka ah waxaa ku jira taxaneyaasha su'aalaha aad ka jawaabayso si aad u codsato maal gelin. Codsiga oonlaynka ah ayaa ka kooban sadex qaybood oo waaway:

<u>Qaybta I</u> waxay baaraysaa u qalmida

<u>Qaybta II</u> ayaa bixinaysa faahfaahinta ururka qaarkeed sida magaca, ciwaanka, EIN ka ururka iyo maal geliyaha dhaqaale, miisaaniyada sanadkii, iyo shaqaalaha

<u>Qaybta II</u> waxa aad nagula wadaagaysaa qaar kamid ah qiyasada ururkaaga iyo saamayntiisa (oo ka kooban, laakiin kuma koobna, khibrada ay soo mareen hogaanka ururkaaga, taariikhda/mustaqbalka saamayntaada bulshada, sida khayraadka barnaamijka EIG u taageeri karaan saamayntaada, iwm.)

**Sidee lagu gaaraa go'aannada deeqda?**
Dhammaan codsiyada waxaa dib u eegaaya oo ansixinaaya Gudiga Qiimeynta oo ka kooban OERJ iyo shaqaalaha kale ee Degmada, iyo sidoo kale wakiillada Machadka Khayriga ah. Qiimeeyaashu waxay si wayn ugu dhaqmaan xeerka adag ee masaalixaha isdiidan iyo xeerarka kale ee masaalixda si loo xaqiijiyo in maal gelinta deeqda loo qaybiyo qaab higsi leh oo lagu saleeyay tiirarka codsiga.

Qiimeyn kasta waxaa lagu saleyn doonaa shuruudaha soo socda:

A. Dhisida Awooda iyo Hormarinta Natiijooyinka Nolosha:
    1. Ma jiraa diirad, waafajin, dedaal, iyo higsi lagu shaqeyn karo oo cad si loo dhiso awooda iyo/ama loo hormariyo natiijooyinka nolosha ee bulshooyinka San Diego ee taariikhiyan iyo haddaba

la duudsiyay: BIPOC, LGBTQIA+, soo galootiga, dadka naafada ah, haweenka, iyo dhalinyarada?

2. Codsigu ma bixinayaa tusaaleyaasha iyo qaababka loo waajahaayo wixii lasoo maray, waxa taagan, iyo/ama mustaqbalka shaqada/saamaynta?
3. Codsigu si qeexan ma u sheegayaa sida ururku u dhisaayo awooda bulshooyinka la sheegay? (uu xoojinaayo bulshada si ay ugu dagaalamaan xuquuqdooda, xal loogu helo sinaan la'aanta nidamaiga ah, loo abuuro isbadel bulsho oo wanaagsan?)

B. Khibrada la Soo maray ee La Matalaayo:
   1. Hogaanka, shaqaalaa, iyo gudiga ururku ma la soo noolaayeen mana yihiin wakiillada bulshooyinka ay doonayaan inay u adeegaan ayna saamayn ku yeeshaan?
   2. Ma jiraa cadeynta qeexan ee gaarka ah ee sida ururku u muujiyo/u fahmo bulshooyinka uu u adeeggo?

C. Adeegsiga Khayraadka la Bixiyay:
   1. Ma jiraa fahanka cad ee sida khayraadka barnaamijka ee la heli karo loo adeegsan doono?
   2. Isticmaalka la doonaayo ee khayraadku ma waafaqsan yahay labadaba shaqada/higsiga/saamaynta la doonaayo ee ururrada IYO shaqada/yoolka Barnaamijka Deeqda Saamaynta Sinaanta?
   3. Ma jiraa fahan cad oo ku aadan sida khayraadka barnaamijka loo joogtayn karo muddo kadib?

**Yaa heli kara codsiyada lasoo gudbiyay?**

Shaqaalaha OERJ iyo xubnaha Gudiga Qiimeynta ayaa heli doona codsiyada lasoo gudbiyay. Maadaama kani yahay barnaamijka deeqda Degmada, xogta lasoo gudbiyo si loo codsado waa diiwaan bulsho qaarkoodna waxaa lagu heli karaa codsiyada sharciga diiwaannada dadwaynaha. Si aad u hesho xog dheeri ah, fadlan akhri [bogga Sharciga Diiwaannada Dadwaynaha ee Degmada California.]

**Goorma ayaa la wargelinayaa dadka deeqda la siinaayo?**
Go'aannada kama danbaysta ah ee deeqda ayaa la shaacin doonaa Nufeembar! Haddii aadan helin deeqda tookadaan waxaan jawaab kaa siin doonaa codsigaaga (marka aad codsato).

**Ma jiraan hanaanka gaarka ah ee qiimeynta ama "soo sheegida" mashruucyada la maal gelinaayo?**
Shaqaalaha OERJ ee Degmada ayaa mudeyn doona kormeero goos-goos ah oo lagu samaynaayo deeq qaateyaasha si loo xoojiyo xiriir ku dhisan waxbarashada wadaaga ah iyo la socoshada saamaynta deeqdu abuurto - qaabka iyo sida hawshaani noqonayso waxaa isla abuuraaya OERJ iyo qaateyaasha deeqda. Xog dheeri ah ayaa laga doodi doonaa inta lagu jiro mareegta deeqda/kooxda sanadka.

**Haddii aan u baahan nahay caawimaad ama aan wax su'aalo ah qabo inta aan buuxinaayo codsiga?**
Fadlan buuxi foomkaan kadibna waan kuusoo jawaabi doonaa.